

# WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA EE MINNESOTA ADEEGYADA DIRAWALKA IYO BAABUURTA

## Shatiga darawalnimada ee loogu talagalay dadka oo dhan

### Maxay tahay?

Sharciga shatiga darawalnimada ee loogu talagalay dadka oo dhan ee cusub wuxuu u ogolaanayaa reer Minnesota inay bilaabaan nidaamka helitaanka ogolaanshaha barista gaari wadista ee caadiga ah, shatiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga caadiga ah laga bilaabo Oktoobar 1, 2023. Sharcigu wuxuu meesha ka saarayaa baahida loo qabo in la muujiyo caddaynta sharci ku joogitaanka Maraykanka si loo bilaabo nidaamka dalbashada.

### Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato


- Waxaad u baahan doontaa inaad keento hal dukumeenti aqoonsi aasaasi ah iyo mid labaad ama laba dukumeenti aqoonsiga aasaasi ah ee ku jira liiska shuruudaha dukumeentiga.
- Waa inaad ku gudubto imtixaanka aqoonta ee qoran ee nooca D (class D) iyo imtixaanka xirfada waddada si aad u hesho shatiga darawalnimada caadiga ah.
- Macluumaadka aad ku bixisay arjigaagu waa xog qarsoodi ah, DVS-na lama wadaagi karto hay'adaha fulinta socdaalka ee madaniga ah ama uma sheegi karto xogta hay'adaha gobolka ama federaalka ee inta badan dhaqangeliya sharciga socdaalka.
- Sharciga shatiga darawalnimada ee loogu talagalay dadka oo dhan ma khuseeyo aqoonsiga DHABTA AH (REAL ID) ah, shatiga darawalnimada ee la xoojiyay ama kaararka aqoonsiga, ama shatiga darawalnimada ganacsiga.

### Maxaa ay tahay in aad samayso hadda

Sawiro koodhka QR ee hoose si aad u hesho koobiga buuga shatiga darawalnimada oo aad u barato imtixaanka qoran.

### Waa maxay shatiga caadiga ah ee darawalnimada, ogolaanshaha barista ama kaarka aqoonsigu?

- Waxaad isticmaali kartaa shatiga caadiga ah si aad si sharci ah gaari u wadid.
- Ogolaanshaha barista ee caadiga ah, shatiga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga caadiga ah ayaa guud ahaan loo aqbalaa caddaynta aqoonsiga haddii aan loo baahnayn aqoonsiga REAL ID.
- Shatiga caadiga ah ee darawalnimada ama kaarka aqoonsiga caadiga ah waxaa lagu qori doonaa "Not for Federal Identification" ("ma aha aqoonsi federaal") sababtoo ah ma buuxinayo shuruudaha aqoonsiga dhabta ah.
- Waxaad isticmaali kartaa aqoonsiga caadiga ah si aad u raacdo diyaaradaha ilaa Maajo 7, 2025.
- Laga bilaabo Maajo 7, 2025, waxaad u baahan doontaa aqoonsi u hoggaansan aqoonsiga REAL ID si aad diyaarad u raacdo, u booqato saldhigyada ciidamada ama si aadu gasho qaar xarumaha federaalka ah, sida xarunta tamarta nukliyeerka. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Aqoonsiga dhabta ah (REAL ID), booqo [drive.mn.gov](http://drive.mn.gov).



Xiriiriyaha buug-gacmeedka  
darawalka



**DVS**  
Driver &  
Vehicle Services